DEEQDA IYO AMAAHDA WAXBARASHADA EE QAXOOTIGA

Adigu ma tahay qaxooti?

Waxa laguu aqoonsanyahay qaxooti haddii aad tahay qof ajnabi ah oo isla markaana magangelyo ka helay Noorway. Waa inaad qaxootinimo ka qorantahay Hay'adda Agaasinka Arrimaha Ajnabiga (UDI).

Waxaad heli kartaa deeq iyo amaah waxbarasho

Haddii aad tahay qaxooti, waxaad heli kartaa deeq iyo amaah marka aad ku jirtid mid ka mid ah waxbarashooyinka Noorway ee Sanduuqa Waxbarashadu (Lånekassen) ogolaaday in lagu qaadan karo deeq iyo amaah.

Waxa ka reeban:
Haddii aad degantahay kaam qaxooti, xaq ma u lihid inaad amaah iyo deeq ka hesho Lånekassen, deeqda qalabka mooyaane, oo la siin karo dhallinyarada aada dugsiga sare. Waxaad heli kartaa deeqo kale iyo amaah marka aad hesho magangelyo oo aad isla markaana ka guurtid kaamka.

Qaxootigu waxay heli karaan deeqda qaxootiga

Qaxootiga aan dhamaystirin dugsiga hoose/dhexe ama dugsiga sare, waxa la siin karaa deeqda qaxootiga si ay u dhamaystiraan. Haddii aad xaq u leedahay deeqda qaxootiga, waxaad lacagta oo dhan ama inteeda badan noqon doontaa deeq. Haddii aad qaadanaysid waxbarasho sare ama waxbarasho nooc kale ah, xaq ma u lihid deeqda qaxootiga, laakiin waxaad codsan kartaa deeqda iyo amaahda waxbarashooyinka Noorway si la mid ah muwaadiniinta Noorway.

Deeqda qaxootiga ugu badnaan saddex sanno

Deeqda qaxootiga waxaad qaadan kartaa ugu badnaan saddex sanno, laakiin inta sanno ee aad heli karto waxay ku xidhantahay xilliga ugu horeeya ee aad bilowdo waxbarashada marka aad hesho magangelyo.

Haddii aad waxbarashada bilowdid saddex sano gudahood kadib marka aad heshay magangelyo, waxaad deeqda qaxootiga heli kartaa saddex sanno. Haddii aad bilowdid afar sanno gudahood, waxaad deeqda qaxootiga heli kartaa labo sanno, iyo haddii aad bilowdid shan sanno gudahood, waxaad deeqda qaxootiga heli kartaa hal sanno.

Muddada aad helayso deeqda qaxootiga waxa lagu dari karaa labo sanno haddii aad leedahay carruur ama ay carruur kuu dhalato muddadii aad xaq u lahayd deeqda qaxootiga. Waa inaad waxbarashada bilowdo ka hor intaan ilmuhu buuxsamin 10 sanno jir. Haddii aad xaq u leedahay waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ka hor intaanad bilaabin dugsiga sare, waxaad deeqda qaxootiga heli kartaa saddex sanno, inkastoo aad waxbarashada bilaawday shan sanno kadib.

Lacagta barmaamijka bilowgu saamayn ayuu ku leeyahay xaqa deeqda iyo amaahda

Xaq ma u lihid inaad hesho deeqda qaxootiga wakhtiga aad qaadatid lacagta barmaamijka bilowga (introduksjonsstønad). Haddii aanad lacagta barmaamijka bilowga qaadanin sannad-dugsiyeedka oo dhan, waxaad deeqda qaxootiga heli kartaa muddada aanad helin **lacagta barmaamijka bilowga**.

Lacag intee leeg ayaad heli kartaa?

Haddii aad aado dugsiga sare adigoo haysta xaqa dhallinyarada, waxa deeqda iyo amaahda loo xisaabinayaa si la mid ah sida ardayda noorweyjiga ah. Laakiin waxa uu kaga duwanyahay in adigu lacagtoo dhan lagaaga dhigayo deeq qaxooti, marka laga reebo amaahda dheeraadka ah iyo lacagta iskuulka. Haddii aad aado dugsi hoose/dhexe, ama haddii aad aado dugsiga sare adigoon lahayn xaqa dhallinyarada, waxa lacagta loo xisaabinayaa si la mid ah sida ardayda noorweyjiga ah ee ku jirta waxbarashada sare. Laakiin waxa uu kaga duwanyahay in amaahda asaasiga ah lagaaga dhigayo deeq qaxooti.

Ogow: Deeqda qaxootiga waxa laga dhigi karaa amaah haddii aad hesho dhaqaale, kaalmo ama aad leedahay hanti dhaaftay xadadka, eeg qoraalka hoose ee ku saabsan arrintan. Amaahda dheeraadka ah iyo lacagta iskuulka ma laga dhigi karo deeq qaxooti.

1 Dhallinyarada dhammaysay dugsiga dhexe ama waxbarasho la mid ah, waxa sharcigu siiyey xaqa waxbarashada dugsiga sare. Xaqa dhallinyaradu waxa uu soconayaa ilaa sannad-dugsiyeedka bilaabmaya sannadka aad buuxsamayso 24 sanno.

Waxbarasho	Qaabkan ayaa loo codsadaa	Lacagta markaad ku jirto waxbarasho buuxda
Waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ee dadka waaweyn. Waxbarasho aad xaq u leedahay marka la eego xeerka waxbarashada § 4A-1 faqradda koowaad.	Isticmaal codsiga waxbarashada sare iyo waxbarashooyinka kale.	**Deeqda qaxootiga:** 56 145 karoon halkii semester.
Waxbarashada dugsiga hoose/dhexe ee ardayga haysta xaqa dhallinyarada. Xeerka waxbarashada § 4A-1 faqradda labaad.	Isticmaal codsiga waxbarashada dugsiga sare.	**Lacag la mid ah inta waxbarashada dugsiga sare ee leh xaqa dhallinyarada, laakiin deeqda qalabka waa cadadka ugu yar. Eeg hoos.**
Waxbarashada dugsiga sare ee ardayga haysta xaqa dhallinyarada. .	Isticmaal codsiga waxbarashada dugsiga sare.	**Deeqda qalabka**: 1 071 – 4 412 karoon, waxay ku xidhantahay barmaamijka waxbarashada. **Deeqda ardayga joogin guriga waalidka**: 4 603 karoon bishii haddii aad ku qasbantahay inaad degto meel guriga waalidka ahayn.Ardayda guriga waalidka joogin ee ka weyn 18 sanno jir waxay heli karaan lacag dheeraad ah oo ah 3 323 karoon bishii. **Deeqda ku xidhan qofka dhaqaalihiisa**: 1 114 – 3 344 karoon bishii haddii dadka ku masruufa haystaan dhaqaale yar. In aad heli kartid, iyo inta aad heli kartid, waxay ku xidhantahay dhaqaalaha waalidkaaga. Lacagta aad xaq u yeelato ee ardayda guriga joogin, deeqda ku xidhan dhaqaalaha iyo amaahda, **waxa laga dhigayaa deeq qaxooti.**
Waxbarashada dugsiga sare ee ardayga aan haystan xaqa dhallinyarada.	Isticmaal codsiga waxbarashada sare iyo waxbarashooyinka kale.	**Deeqda qaxootiga**: 56 145 karoon halkii semester.
Waxbarasho sare iyo waxbarashooyinka kale. Jaamacad ama machad sare. Waxbarasho sare sida machad dadweyne oo sare, dugsi xirfadeed, dugsi farshaxaneed ama dugsiyada teknoloojiyada macluumaadka iyo is-gaadhsiinta.	Isticmaal codsiga waxbarashada sare iyo waxbarashooyinka kale.	**Ma** qaadan kartid deeqda qaxootiga marka aad ku jirto waxbarasho sare ama waxbarasho kale. Laakiin waxaad heli kartaa deeq iyo amaah ku salaysan xeerarka loo raaco ardayda noorweyjiga ah, taas oo macnaheedu yahay ilaa iyo 56 145 karoon halkii semester oo ah amaah asaasi ah marka ay tahay waxbarasho buuxda. Ilaa iyo boqolkiiba 40 amaahda asaasiga ah ayaa laga dhigi karaa deeq haddii aanad ku noolayn guriga waalidkaaga. Macluumaad dheeraad ah ka akhriso www.lanekassen.no Haddii aad tahay arday ku jira waxbarasho sare ama dugsi xirfadeed oo buuxda, waxaad heli kartaa deeq iyo amaah dheeraad ah.

Marka laga tago lacagaha aad ku aragtid shaxda, waxa kale oo aad xaq u yeelan kartaa
• deeqda carruurta iyo amaah dheeraad ah haddii aad hayso carruur
• amaah dheeraad ah haddii aad ka weyntahay 30 sanno jir • amaahda lacagta iskuulka
• deeq dheeraad haddii laxaadkaagu/awoodaadu hoos u dhacday

Deeqda qaxootiga waxa loo beddeli karaa amaah

Deeqda qaxootiga waxa dhamaanteed ama qayb ka mid ah laga dhigi karaa amaah haddii aad heshay dhaqaale, kaalmo ama hanti ka badan xadka lagu sheegay xeer-nidaamiyaha. Haddii aad masruufto carruur, waxa la yarayn karaa ama meesha ka bixi kara deeqda carruurta haddii adiga ama seyga/xaasku helay dhaqaale, kaalmo ama hanti ka badan xadka lagu sheegay xeer-nidaamiyaha.

Dib u eegista dhaqaalaha, kaalmooyinka ama hantida waxa la samaynayaa xagaaga/deyrta sannadka ku xiga xilligii aad heshay deeqda ama amaahda, marka xisaabta cashuurtaadu soo baxdo.
Macluumaad dheeraad ah ka akhriso www.lanekassen.no.

Qaabkan ayaa loo codsadaa deeq iyo amaah

Ma jiro foom codsi oo u gaar ah deeqda qaxootiga. Waa inaad isticmaashid codsiga deeqda iyo amaahda ee aad ka helayso www.lanekassen.no.

Haddii aad ku jirto ama bilaabi doonto barmaamijka bilowga wakhti ka mid ah muddada aad codsanayso deeq iyo amaah, waa inaad soo dirtid koobiga go'aanka degmada ama Nav ee muujinaya muddada aad helayso lacagta barmaamijka bilowga.

Haddii aad dhammaystirtay barmaamijka bilowga, waa inaad soo dirtid cadayn ka socota degmada ama Nav oo **muujinaya taariikhda aad dhammaystirtay barmaamijka bilowga**.

Lånekassen waxa uu UDI ka soo qaadanaya macluumaad ku saabsan sharciga aad ku degantahay waddanka. Taas darteed adigu ma u baahnid inaad soo dirto cadaymo ka socda UDI haddii aanaan ku weydiinin.

Jawaabta codsiga deeqda iyo amaahda

Codsigaaga iyo jawaabtiisa waxaad kala socon kartaa bogga aad ku leedahay (Dine sider) www.lanekassen.no.

Bixinta lacagta

Ka hor intaanad helin lacagta, waa in saddexdan arrimood diyaar noqdaan:

1. Waa in iskuulkaagu xaqiijiyo in lagu lagu qoray waxbarashada oo aad ka soo qaybgashay waxbarashada.
2. Waa inaad sheegtay lambar akoon baangi oo noorweyji ah oo adigu leedahay. Waxaad ku qoraysaa codsiga. Lambarka akoonka waxaa ka beddeli kartaa boggaaga (Dine sider).
3. Waa in aad saxeexday heshiiska kaalmada.
   • Haddii aad buuxsantay 18 sanno jir, waa inaad adigu saxeexdo heshiiska kaalmada.
   • Haddii aad ka yartahay 18 sanno jir, waa in mid ka mid ah waalidkaagu saxeexo heshiiska kaalmada. Haddii aad lahayn waalid, ama waalidkaagu deganyihiin waddan kale, waa in masuulkaagu saxeexo heshiiska kaalmada. Haddii lagu siiyo amaah, waa in adiga iyo waalidka/masuulku saxeexdaan heshiiska kaalmada.

Haddii aad joojiso waxbarashada

Haddii aad joojisid waxbarashadaada, waa inaad isla markiiba u soo sheegtid Lånekassen.

Maclumaad dheeraad ah ka akhriso lanekassen.no

Lånekassen

Cadadka lacaguhu waxay khuseyaan sannad-dugsiyeedka 2020-2021.